POLICY BRIEF 12/2021

# AQALKA SARE SOMALIA

## Khilaafka Dastuurka ku jiro, Dheelitir la'aanta Senatarada and Doorashada Boobka ahayd.



DISEMBER 2021

AARAN CENTER
For Social and Economic Development

# TUSMO


**Hordhac** 2

**Qeybta 1aad: Taariikhda Aqalka Sare** 3

Doorka Dastuurka 5

Qaab-dhismeedka 6

**Qeybta 2aad: Waxqabadka Aqalka Sare** 10

**Qeybta 3aad: Doorashada Aqalka Sare** 11

Doorashada 2021 11

Doorashada iyo Ololaha Musharaxiinta 14

Qoondada Haweenka 18

Xalinta Khilaafaadka 18

Amniga 18

Korjoogtada 19

Musuq-masuq iyo Nin-jecleysi 19

**Qeybta 4aad: Gunaanad iyo Talo Jeedin** 20

# HORDHAC

Aqalka Sare ee Soomaaliya (AS) waa mid ka mid ah labada aqal ee sharci dejinta Soomaaliya. Waxaa la aasaasay sanadkii 2016-kii, wuxuuna ka kooban yahay 54-kursi. Sida uu qabo Dastuurka, dhammaan Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ayaa tiro isla eg ah ku yeelanaya Aqalka Sare, xubnuhuna waxay matalayaan dhammaan beelaha Soomaaliya. Hase ahaatee, Dowlad Goboleedyada (DG) qaarkood ayaa loo qoondeeyay kuraas ka badan maamulada kale halka beelaha qaar ay yihiin kuwo aan matalaad dhab ah ku lahayn AS.

Dastuurku wuxuu labada aqal siinaya awood sharci dejin oo laga maarmaan ka dhigaysa wada shaqeyntooda. Laakiin xiriirka labada aqal ayaa waxaa hareeyay is qabqabsi joogto ah iyo khilaaf aan dhammaad laheyn, kaasoo sababay in Aqalka Sare uu gabi ahaanba hakiyo shaqadiisa. Xukuumada ayaa xeeraysay sharciyo xasaasi ah waxayna dhistay guddiyo qaran iyadoon AS laga talo gelin. Dhanka kale wadashaqeynta DFS iyo DG ayaa inta badan hakad ku jiray.

Soomaaliya waxay ku taamaysaa sidii ay u heli lahayd hab dawladnimo oo dimoqraadi ah iyo doorashooyin lagu kalsoonaan karo. Doorashooyinku waa qayb ka mid ah himilooyinka shacabka Soomaaliyeed si ay u helaan hoggaamiyeyaal ixtiraama oo hirgeliya dastuurka korna u qaada awoodda hay’adaha dowladda si ay ugu adeegaan shacabkooda. Hannaanka doorashada 2021 ah ah mid rajo beel ka dhigaysa himilooyinkaas.

Xarunta Aaran ayaa dib u milicsatay abuurista Aqalka Sare ee Soomaaliya, waxayna qiimeyneysaa heerka uu gaarsiisan yahay hannaanka doorashada Aqalka Sare ee 2021-ka. Warbxintan waxay u habaysan tahay afar qaybood:

Qaybta 1aad waxaynu dib u eegaynaa sababta ka dambaysa abuurista Aqalka Sare, doorkiisa dastuuriga ah iyo qaab dhismeedkiisa. Waxaan marka hore eegeynaa cilladaha ku jira Dastuurka, sababta keentay dheelatir la’aanta saami-qaybsiga kuraasta iyo hanaanka loo maray qeybinta kuraasta Aqalka Sare. Qaybta 2aad waxaan si kooban uga hadlaynaa waxqabadka AS muddadii uu jiray. Xiriirka wada shaqayneed ee AS iyo Golaha Shacabka, la xisaabtanka dowladda iyo matalaadda DG. Qaybta 3aad waxaan qiimayn ku samayneynaa doorashada 2021. Qaybta 4aad waa gunaanad iyo soo jeedin talooyin ku saabsan sidii AS looga dhigi lahaa mid cad doorkiisa dastuuriga ah, dheelitiran, si dhab ahna u matalaya DG.

# QAYBTA 1AAD: TAARIIKHDA AQALKA SARE

## Sababta Loo Aasaasay Aqalka Sare

a) Taariikh ahaan arrinta ku saabsan qaab-dhismeedka dowladeed ee dalku yeelanayo; in dowlad dhexe (unitary state) ama federaal (dowlad federaal ah) noqoto kuma cusba Soomaaliya. Arrintaas waxaa si weyn looga dooday sannadihii 1959-1960-kii markii la diyaarinayey dastuurkii ugu horeeyey. Xisbiyada siyaasadeed ee taageersanaa nidaamka federaalka, sida Hizbiya Dastur Mustaqil Somalia (HDMS), waxay ku andacoodeen in haddii la helo federaal la helayo xasilooni siyaasadeed, nabad, cadaalad, horumar dhaqaale iyo ilaalinta dhaqanka soo jireenka. Iyadoo dhinacyada ka soo horjeeda federaalka ay ku andacoodeen sharci-dejin labada aqal ay watqi dheer qadaneyso inay soo dedejiyaan shuruucdii markaas loo baahnaa. Dood dheer ka dib, waxaa la qaatay qaab-dhismeedkii hal aqal, kaas oo loo arkay in uu ka fudud yahay, isla markaana aad ugu habboon in laga midho dhaliyo himiladii qaran ee waagaas jirtay ee ahaa xorraynta iyo midaynta dhulka Soomaaliyeed ee ku harsan gacanta gumaystaha.

b) Kacaankii 1969kii wuxuu laalay dastuurkii wadanka waxaa lagu xukumayey qaab dowlad dhexe (unitary) oo adag, shacabkana wax go’aan ah u lahayn.

c) Ka dib burburkii 1991kii, dagaaladii sokeeye ee daba dheeraadayna kuma ekayn oo kaliya in ay burburiyaan hay’adaha dawliga ah ee waxa ay dib u soo nooleeyeen loolankii hore ee qabyaalada ee sababay in ay lumiso kalsoonida shacabka Soomaaliyeed ay isku qabeen.

d) Geeddi-socodkii loogu jiray dib-u-dhiska dawladadeed (dowlad dhexe ama federal leh labo aqal) ayaa dib u soo cusboonaaday. 2004tii waxaana lagu heshiiyey in nidaamka federaalka uu yahay qaabka ugu wanaagsan ee lagu maamuli karo dalka.

# DOORKA DASTUURIGA AH EE AQALKA SARE

Waajibaadka sharci dejinta ee Aqalka Sare ayaa ku xusan qodobka 71-aad ee Dastuurka KMG ah. Sidoo kale, shaqada Senatarada ayaa ah inay matalaan deegaanadooda iyo dowlad goboleedyada ay ka soo jeedaan.

## Sharci Ahaanshaha Dowlad Goboleedyada

Ka hor inta aanan ka hadlin arrimaha la xiriira matalaadda DG ee AS, waxaan dulmar guud ku sameynaynaa dhowr mabaadi' oo aasaasi ah ee ku xusan qodobka 49-aad ee dastuurka oo qeexaya dhisidda iyo sharci ahaanshaha Dowlad-goboleedyada.

a) Qodobka 49 (1) wuxuu dhigayaa "Tirada iyo xuduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa go'aaminaya Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah". Ilaa hadda ma jiro sharci qeexaya tirada iyo xuduudaha DG oo uu ansixiyay Golaha Shacabka ama hindishe sharciyeed loo soo jeediyey.


b) Qodobka 49-aad (4) waxa uu dhigayaa “Tirada iyo Xuduudaha Degmooyinka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxa qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Dawladda Federaalka, kaas oo ay tahay in uu ansixiyo Golaha Shacabka.” Ma jiro sharci qeexaya tirada iyo xudduudaha degmooyinka ee dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka ama hindise sharciyeed la hor keenay golaha shacabka.

Shuruucdaas asaasiga ah laguma dhaqmin intii lagu guda jiray geeddi-socodkii lagu dhisayey maamullada Jubaland, Koonfur-Galbeed, Galmudug iyo Hirshabeelle. Rabitaanka dadka gobolladaas ayaa si sax ah loogala tashan si ay iskood u midoobaan. Hannaankii loo sameeyay DG, waxaa soo baxaysa in (i) cadaadis weyn oo ka yimid Beesha Caalamka (ii) tixgelin la’aanta rabitaanka shacabka, iyo (iii) iyadoo aan loo hogaansamin mabaadi'da dastuuriga ah ee dhisitaanka dowlad goboleedyada. Taasoo ka dhigaysa dowlad goboleedyada kuwaas oo sharci ku dhisnaashahooda dhameystirnayn.




# QAAB DHISMEEDKA AQALKA SARE

Qodobka 72aad ee Dastuurka KMG ah wuxuu dhigayaa in tirada Senatarrada ay noqdaan 54, iyadoo lagu saleynayo siddeed iyo tobankii (18) gobol ee Soomaaliya ka jiray 1991 ka hor, tiro siman ay lahaadaan dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah DFS isla markaana ay matalaan dhammaan beelaha ku dhaqan Soomaaliya. Puntland iyo Somaliland ayaa ka kuraas badan maamulada kale oo min 11 xubnood haysta. Afarta maamul (Hirshabelle, Galmudug, Koonfur Galbeed iyo Jubaland) ayaa heysta min 8 xubnood. Gobolka Banaadir ayaan isna metalaad ku laheyn Aqalka Sare.




Si loo fahmo dheelitir la'aanta matalaadda AQ, waxaa habboon in marka hore la eego cilladaha ku jira Dastuurka oo aan ka hadalno sida isu-dheellitir la'aantan ay u dhacday.

Sidee ku timid 54?

Dastuur-sameeyayaasha waxay isticmaaleen 18-kii gobol ee 1991 ka hor jiray, iyagoo u qoondeeyay min saddex (3) kursi gobolkiiba. Dhibaatada hadda jirta waxay ka dhalatay marka qaar ka mid ah DG (khaasatan Puntland, Somaliland iyo Galmudug) xudduudahooda lagu saleeyey xuduud beeleed halkii laga salayn lahaa xadaynta gobolladii horey u jiray.

a) Xuduudaha Puntland waxa ay salka ku haysaa xuduud beeleed, inkastoo Somaliland ay ku muransan yihiin. Waxay Puntland ka kooban tahay; gobolada Bari iyo Nugaal, bariga Gobolka Sanaag, bariga Gobolka Sool, qeyb ka mid ah Waqooyiga Gobolka Mudug iyo Degmada Buuhoodle ee gobolka Togdheer. Soohdin beeleedkan ayaa Puntland ka dhigaya Hartiland, oo u dhigma saddex gobol iyo bar (3½) ama ku dhawaad afar gobol. Haddii la tixraaco qodobka 72 (1) Puntland waxay heleysaa ilaa 11 kursi oo Aqalka Sare ah.

b) Somaliland waxay ka kooban tahay gobolada Awdal iyo Waqooyi Galbeed, iyo qayb ka mid ah Togdheer, qayb ka mid ah gobolka Sanaag iyo qayb ka mid ah gobolka Sool. Soohdimo beeleedka ayaa Somaliland ka dhigaysa Dirland Waqooyi, oo u dhiganta saddex gobol iyo bar (3½), sidaas darteed Somaliland waxaa ku soo aadaya 11 kursi ee Aqalka Sare ah.

c) Sidoo kale waxaa cillad ku jirtaa dhismaha maamul-goboleedka Galmudug, taasoo aan waafaqsanayn qodobka 49 (6) ee waajibinaya in "Labo gobol iyo wixii ka badan ay sameysan karaan Maamul Goboleed". Maamulka Galmudug wuxuu ka kooban yahay hal gobol iyo bar (1½) soohdimihiisana waa soohdin qabiileed taasoo ka dhigaya Galmudug Hawiyeland. Qodobka 72 (1) wuxuu siinayaa Dawlad Goboleedka Galmudug ugu badnaan shan (5) kursi halka hadda ay heystaan sideed (8) kursi.

Dawlad goboleedyada Hirshabeelle, Koonfur Galbeed iyo Jubaland waxay si sax ah uga kooban yihiin laba gobol iyo wixii ka badan sida uu qabo Dastuurka.

a) Hirshabeelle waxay ka kooban tahay laba gobol (Sh/dhexe iyo Hiiraan), waxay ahayd inay heystaan lix (6) kursi si waafaqsan qodobka 72 (1) ee Dastuurka. Laakiin haatan waxay heystaan siddeed (8) kursi.

b) Koonfur Galbeed waxa ay ka kooban tahay seddex gobol (Sh/hoose, Baay iyo Bakool) waxay ahayd in ay haystaan sagaal (9) kursi si waafaqsan qodobka 72 (1) ee dastuurka. Hadda waxay heystaan 8 kursi.

c) Sidoo kale, Jubaland waxay kooban tahay saddex gobol (Jubbada Dhexe, Jubbada Hoose iyo Gedo) waxay ahayd in heystaan sagaal (9) kursi halkii ay hadda tahay 8 kursi.

## Hannaankii loo Qeybiyey Kuraasta Aqalka Sare

I2016, Madasha Hogaamiyayaasha Qaranku (MHQ) ayaa lahaa mas'uuliyadda qoondaynta kuraasta AS. Ciladaha ku jira Dastuurka awgeed, Madashu waxay ku adkaatay sidii ay u qybin lahaayeen kuraasta AS. Waxaa iska hor imaanayey in kuraasta loo qoondeeyo goboladii jiray ka hor 1991-kii (sida ku cad farqada (4) ee qodobka 72 ee dastuurka) iyo in tiro siman la siiyo DG sida ku cad farqada (5) ee isla qodobkaas. Waxaa muuqatay in 54 kursi aan la qeybin karin iyadoon waxba laga bedelin Qodobkaas. Siyaabaha ay Madashu isku dayday inay wax ku xaliyaan waxaa ka mid ahaa:

- In la kordhiyo tirada kuraasta AS ilaa ku dhawaad 80 kursi. Soo jeedintan ayaa u baahatay wax ka bedel dastuuri ah oo uu sameeyo Baarlamaanka mar haddii Madashu aysan lahayn awood dastuuri ah. Cadaadis beesha caalamka ka yimid dartiis, waxaa la isku raacay in aan wax ka bedel lagu sameyn tirada kuraasta ka hor doorashada.

- Madashu waxay soo jeedisay in hal sano dib loo dhigo doorashada iyo aasaaska AS si fursad loo siiyo baarlamaanka inuu saxo khaladaadka ku jira qodobka 72 ee dastuurka. Puntland iyo Somaliland ayaa si weyn uga soo horjeestay dib u dhigista dhisitaanka AQ iyagoo ku hanjabay inay qaadacayaan doorashada Golaha Shacabka haddii aan la xalin arrinta AS.

- In la tixgeliyo maqaamka Muqdisho iyo matalaadda ay ku yeelanayso AS. Madashu waxay ka doodday, balse waxay isku mari waayey maqaamka Muqdisho iyo inta kursi ee loo qoondeeynayo.

Ugu dambeyntii waxaa la isku raacay in si siman loo qaybsado 54 kursi, DG kasta oo ay ku jirto Somaliland la siiyo sagaal (9) kursi. Madaxweynaha Puntland ayaa dhowr todobaad kadib ku wargaliyay MHQ in ay ku adkaatay in sagaalka kursi loo qeybiyo beelaha waaweyn ee Puntland maadaama Somaliland diiday in la siiyo saamiga beelaha Warsangeli iyo Dhulbahante ee Sool iyo Sanaag. Sidoo kale, Somaliland waxay sheegtay in sagaal kursi aanay ku filnayn oo ay u baahan tahay ugu yaraan laba kursi oo dheeraad ah oo u gaar u ah Dirta Waqooyi. Labada Maamul ee Puntland iyo Somaliland ayaa mar kale ku dhawaaqay in aysan gabi ahaanba ka qayb qaadan doonin doorashada Golaha Shacabka haddii aan arrintan la xalinin taasoo jahawareer ku riday hannaankii doorashada ee 2016.

Dowlad goboleedyada Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabeelle ayaa go'aan ku gaaray in min hal kursi laga jaro qoondadooda 9 kursi, waxaana si ku meel gaar ah min labo kursi loogu daray Puntland iyo Somaliland. Waxaa la isla gartay in marka ugu horaysa la dhaariyo baarlamaanka 10aad soo socda in uu ka doodo waxna ka bedelo qodobka 72 ee dastuurka si loo xaqiijiyo in dhammaan dowlad goboleedyada iyo beeluhu ay helaan matalaad siman. Shan sanno ka dib, heshiiskan marna lama horgeyn Baarlamaanka Federaalka.

### Gobolka Banaadir


Muqdisho, ama Banaadir, waa caasimadda dalka waana magaalada ugu dadka badan Soomaaliya. Qodobka 9-aad ee dastuurka ayaa ku dhigaya in Muqdisho ay tahay caasimadda Soomaaliya, sharci u gaar ahna loo sameeynayo inta lagu guda jiro dib u eegista dastuurka. Laakiin dib u eegista dastuurka ayaa noqday mid aan dhammaanayn.

2016-kii Madaxda dalka waxay ka wada hadleen Maqaamka Muqdisho inay noqoto Degmo Federaal ah oo aan wax matalaad ah ku lahayn Aqalka Sare ama lasiiyo maqaam dowlad goboleed. Guddi Baarlamaan ayaa soo jeediyay 7 kursi, qaar ka mid ah xubnaha Madasha ayaa soo jeediyay shan kursi halka xubnaha kale ee isla Madasha ay soo jeediyeen shan iyo toban kursi in lagu qeybsado habka awood qeybsiga ee 4.5. Ma jirin wax go'aan ah oo la gaaray 2016 sidaas darteed arrintan ayaa dib loo dhigay.

Golaha Shacabka ayaa 27-kii June 2020 waxa uu meel mariyay qaraar ku saabsan matalaadda Muqdisho ee Aqalka Sare oo siinaya saddex iyo toban (13) kuraas. Inkastoo Guddoomiyaha Aqalka Sare uu ka soo horjeestay go'aankaas oo uu ku sababeeyay in qaraarka uu u baahan yahay in wax ka bedel dhameystiran lagu sameeyo dastuurka, Madaxweyne Farmaajo 28-kii Janaayo 2021-kii wuxuu qalinka ku duugay sharcigaas. Balse tani waxay u muuqatay mid siyaasadeed oo keliya. Heshiiskii DFS iyo DG ku dhexmaray Dhuuso Mareeb iyo Muqdisho laguma soo hadal qaadin arrinta Gobolka Banaadir. Markaa maqaamka iyo matalaadda gobolka Banaadir ee Aqalka Sare ayaa weli ah arrin muran badan dhalisay.

# QAYBINTA KURAASTA

Sida dastuurku qabo, xubnaha AQ waa in ay noqdaan kuwo metela dhammaan beelaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Dawlad goboleed kastaa waxay qaadatay qaacida u gaar ah si ay kuraasteeda ugu qaybsido beelaha. Wakiilada AS ee hadda jira maaha mid ku dhisan cadaalad iyo dastuur midna. Kuraasta AS waxaa loo qeybiyay beelaha Soomaaliyeed: Dir (14), Digil iyo Mirifle (8), Daarood (17), Hawiye (13) iyo beelaha laga tirada badan yahay oo leh labo kursi.




Shirkii Carta ee Jabuuti 2000, Soomaalidu waxay qaadatay nidaamka loo yaqaan 4.5 kaasoo saami qaybsi siman siinanaya afarta beelood ee waaweyn (Daarood, Dir, Hawiye iyo Digil & Mirifle) iyo kala badh saami qaybsi dadka laga tiro badan yahay. Nidaamka 4.5 ayaa loo arkaa inuu yahay qodobka ugu weyn ee keenay xasilooni, maadaama uu abuurayo sinnaanta qabaa'ilada Soomaaliyeed iyadoo aysan jirin hab kale oo lagu heshiiyey.

Aqalka Sare waa mid aan dimuqraadi ahayn, mana waafaqsana dastuurka iyo habka lagu heshiiyey ee 4.5. Saami-qaybsiga kuraasta Aqalka Sare ma siinayso dawlad-goboleed sinaaan, kuma salaysna tirada dadka. Saami qaybsiga kuraasta AS ayaa si weyn loogu muransan yahay maadaama maamul goboleedyada iyo beelaha qaar ay yihiin kuwo aan matalaad dhab ah ku lahayn.

Qabiilada qaar (gaar ahaan Digil & Mirifle iyo Beesha 5-aad) ayaa ku dulman kuraasta Aqalka Sare. Tusaale ahaan, doorashadii 1956, qowmiyadda Digil & Mirifle oo uu matalay xisbiga HDMS ayaa ahaa xisbiga labaad ee ugu xooggan isagoo helay 13 kursi 70ka kursi lagu tartamayey. Hadda waxa loo qoondeeyay kaliya 15% wadarta guud kuraasta AQ. Beelaha Koonfur Galbeed waxay rabaan in dib loo eego qoondaynta kuraasta AQ.

Xubnaha ka soo jeeda qabiilooyinka laga tirada badan yahay ayaa sidoo kale dulman. Halka nidaamka 4.5 uu yahay mid ka fog cadaalada. Sida ku cad qodobka 72 (c) , haddii habka 4.5 lagu dabaqi lahaa qoondaynta kuraasta AS, qabaa'ilada laga tirada badan waxay heli lahaayeen 5 kursi halka hadda ka heystaan 2 kursi keliya. Shacabka Muqdisho ayaa sidoo kale ah kuwo aan matalaad ku lahayn Aqalka Sare. AS si sax ah ugama tarjumeyso xaqiiqada iyo waaqaca bulsho iyo siyaasadeed ee Soomaaliya. Haddaba, waxaa loo baahan yahay in lala yimaado qaabkii looga bixi lahaay meertadan.

Soomaaliya waxay ku socotaa nidaamka dimuqraadiyadda ee xisbiyada badan iyo hal qof iyo cod. Saami qaybsiga kuraasta AQ in lagu saleeyo;

a) tirada dadka gobolka ayaa mudan in la tixgeliyo ama

b) dhammaan FMS waa inay lahaadaan tiro siman oo kuraas ah iyada oo aan loo eegin tirada dadka.

Goboladii jiray 1991-kii wixii ka horeeyay waa in Dastuurka laga saaro maadaama aysan hadda waaqici ahayn. xasilooni siyaasadeed, cadaalad, amni iyo horumar dhaqaale ayaa la gaari karaa marka sinnaan heer dowlad goboleed iyo matalaad bulsho oo dhab ah la helo.



AARAN CENTER
For Social and Economic Development

# QAYBTA 2AAD: WAXQABADKA AQALKA SARE

Ansaxinta sharciyada la soo jeediyay iyo matalaada dowlad goboleedyada ayaa ah shaqooyinka asaasiga ah AS leeyahay. 27dii December 2016 waxaa si wadajir ah loo dhaariyay xildhibaanada Labada Aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya, waxaana ay aheyd markii ugu horeysay oo ay kulan wada jir ah yeeshaan. Labada aqal ayaa ku fashilmay howlihii loo igmaday ee ahaa dhameystirka dastuurka, la xisaabtanka xukuumadda iyo gaarsiinta wadanka doorasho qof iyo cod ah.

**Doorka Sharci-dejinta**

Dastuurku waxa uu dhigayaa nidaamka labada aqal, kaas oo sharciyada la soo jeedinayo ay tahay in ay ku heshiiyaan laba aqal. Aqalka Sare waxa uu leeyahay awood sharciyeed ay ku ansixiyaan ama ku diidaan hindise-sharciyeed loo soo gudbiyo. Dastuurku waxa kale oo uu dhigayaa habka lagu xalin karo ismari waaga ka dhasha haddii Aqalka Sare ku guul daraysato inuu ansixiyo hindise sharciyeedka golaha wakiilada soo gudbiyey. Xiriirka labada aqal waxaa hareeyay isqabqabsi joogto ah iyo khilaaf aan dhamaad lahayn, taasoo keentay in Aqalka Sare uu gabi ahaanba hakiyo shaqadiisa muddo labo sano. Waxaa jiray xeerar iyo magacaabid guddiyo heer qaran ah oo aanay Aqalka Sare soo marin. Inkastoo afhayeenka AS uu ku tilmaamay tillaabooyinkaas kuwo aan dastuuri ahayn, haddana Madaxweyne Farmaajo waxa uu si joogta ah iska indhatiray AS, isagoo dhisay guddiyo heer qaran ah oo muhiim ah, isla markaana saxiixay sharciyo xasaasi ah iyadoo aan ogolaansho laga haysan AS.

**Matalaada Gobolada**

Marka laga reebo awoodahooda sharciyeed, AS waxay ahayd inuu xaqiijiyo danaha dowlad goboleedyada. Si la isugu xiro dawladda dhexe iyo DG, xubnaha AS waxa 'si dadban' u doorta xubnaha golayaasha DG. Hase ahaatee, isku xirka ma aha kuwo macno leh. Mowqifka siyaasadeed ee Aqalka Sare iyo DG ayaa isna is waafaqsaneyn.

Wadashaqeynta ka dhaxeysa DFS iyo DG ayaa inta badan hakad ku jiray sanadihii la soo dhaafay. dadaallo badan ka dib, AS wuu awoodi waayey inuu xaliyo khilaafka DFS iyo DG, sidoo kale wuxuu ka hortigi kari waayey faragelinta DFS ay ku haysay doorashada maamul goboleedyada.

Awoodda Siyaasadeed

Abuuristii AS ka dib, waxaa jiray jahawareer ku saabsan sidii AS uga mid noqon lahaa hannaanka awood qaybsiga Soomaaliya. Sidaas darteedna uusan lug ku lahayn go'aannada siyaasadeed ee waaweyn. Waxaa jiray walaac laga qabay in Aqalka Sare uu wiiqayo awooda siyaasadeed Golaha Shacabka. AS ma lahan awood fulineed oo ay kula xisaabtanto xukuumadda. Golaha Wakiilada oo keliya ayaa leh la xisaabtanka xukuumadda. Dastuurka Soomaaliya ayaan ku caddayn kala xadeynta doorka siyaasadeed ee aqal walba, waxaana meesha ka maqan maxkamad awood u leh in ay soo afjarto khilaafka labada aqal. Shirguddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa horay waxaa u dhexeeyey khilaaf xooggan, waxaana joogsaday wadashaqeyntii u dhaxeysay labada Aqal. Bishii Janaayo 2019, AS wuxuu soo saaray bayaan ah in AS aysan la shaqeyn karin Golaha Wakiilada waxayna ka dalbadeen Madaxweynaha inuu soo farageliyo. Khilaafkoodu waxa uu gaadhay in shirguddoonka Golaha Wakiiladu la saftaan Xukuumadda iyo Guddoomiyaha AS la safto kooxda mucaaradka ah. Bishii Luulyo 2019, Shir-guddoonka Labada Aqal ayaa ku dhawaaqay inuu dhamaaday khilaafkii u dhexeeyay ayna soo celiyeen wada shaqayntii labada Aqal. Laakiin heshiiskaas wuxuu ahaa mid muddo gaaban jiray. Gudoomiyaha UH ayaa laga hor istaagay inuu ka mid noqdo golaha wadatashiga qaranka oo looga hadlay arrimaha doorashooyinka qaranka.

Halkaa waxaa ka cad in AS aanu awood u lahayn inuu si waafi ah u matalo danaha dawlad-goboleedyada iyo beelaha. Dad badan ayaa is weydiiya baahida loo qabo aqal kale iyagoo ku doodaya Aqalka Sare yahay mid aan ilko siyaasadeed lahayn oo qaali ah.

# QAYBTA 3AAD: DOORASHADA AQALKA SARE

Sida ku cad qodobka 72-aad ee Dastuurka Soomaaliya, xubnaha Aqalka Sare ayaa waxaa lagu doortaa doorasho toos ah, qarsoodi ah, oo ay doortaan baarlamaanka DG. Soomaaliya weli ma lahan doorasho xor ah oo joogto ah, sidaas darteed beesha caalamka waxay ku cadaadiyaan madaxda DFS iyo DG inay qabtaan ugu yaraan nooc doorasho afartii sanaba.

**Doorashadii 2016**

Doorashada AQ ee 2016 waxaa la qabtay iyadoo la raacayo qodobbadii heshiiska Madasha Hogaamiyasha Qaran. Hogaamiyayaasha DG waxa la siiyay awood ay ku soo xulaan musharixiinta AQ iyadoo kursi kasta loo xadiday inay ku tartamaan laba musharax oo kaliya, kaasoo ahaa qorshe khaldan. Xubnaha AQ waxaa doortay baarlamaanada DG.

Hannaanka doorashada dadban ee 2016 ayaa inta badan si nabad ah ku soo dhamaaday balse waxaa hareeyay qaladaad iyo musuq badan oo sababay in guud ahaan geeddi-socodka doorashooyinka hoos u dhaco. Natiijooyinka doorashada AQ ayaa inta badan ka tarjumaysa danta siyaasadeed ee madaxda gobolada. Dadka qaar ayaa ku doodaya in qaabka doorashada 2016 loo arkayay jaranjaro Soomaalida uga gudbaysa doorashada xigta. Laakiinse, doorashooyinka 2021 ayaa sidoo kale waxaa hareeyay eedeymo wax isdaba marin badan.

.

**Doorashada 2021**

**U Diyaar Garowga Doorashada 2021**

Khilaafka daba dheeraaday ee DFS iyo DG, xurgufta labada aqal ee baarlamaanka, dagaalka siyaasadeed ee DFS iyo kooxaha mucaaradka, ayaa qaatay waqti badan oo loo baahnaa in loogu diyaar garowo doorashada 2021-ka.

In ka badan 3 sano, maamulka Farmaajo wuxuu wacad ku marayey inuu qaban doono doorasho qof iyo cod ah (OPOV) – waana arrin hal mar ka dhacday Soomaaliya tan iyo markii ay xornimada qaadatay 1960. Qaramada Midoobay iyo deeq bixiyayaasha reer galbeedka ayaa ku cadaadinayey dowladda Madaxweyne Farmaajo in la qabto doorasho qof iyo cod ah. Nidaamka OPOV ee 2020-2021, waxaa loo arkaayey mid wax ka bedelaysa isdaba marin iyo musuqmaasuqa badnaa ee doorashada dadban ee 2016-2017. Bishii Febraayo 2020 Maxamed Farmaajo ayaa saxiixay sharci, ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka, kaasoo siinaya dhammaan muwaadiniinta xuquuqda cod bixinta doorashada baarlamaanka. Hase ahaatee, way caddayd in OPOV aanu shaqaynayn xaaladaha siyaasadeed iyo ammaan ee jira awgeed. Saamileyda siyaasadeed, oo ay ku jiraan qaar ka mid ah FMS iyo kooxaha mucaaradka, ayaa diiday sharciga iyagoo ku tilmaamay mid aan la dhaqan gelin karin.

Bishii Juun 2020, Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka (NIEC) ayaa ku dhawaaqay in guddigu uusan qaban karin doorashada OPOV waqtigii loogu talagalay iyadoo ku sababeeyey qalalaasaha siyaasadeed, amni-darrada, COVID-19, iyo masiibooyinka bini'aadantinimada ee wadanka ka jira.

Markii la arkay in doorasho toos ah oo ay dowladdu ballan qaaday iyo nooc kale oo doorasho lagu heshiiyey jirin, muddo xileedka dastuuriga ahaana ee baarlamaanka iyo madaxweynaha uu gabaabsi yahay, beesha caalamku waxay bilaabeen inay cadaadis ku saaraan DFS iyo DG si loo helo go'aan midaysan. Dabayaaqadii bishii June 2020, madaxda DFS iyo kuwa DG ayaa kulan ku yeeshay magaalada Dhuusamareeb ee xarunta dowlad goboleedka Galmudug, waxayna ka wada hadleen sidii loo heli lahaa qaab doorasho oo lagu shaqeyn karo. Bishii Ogosto 2020, saddex shir kadib, DFS iyo DG waxay ku heshiiyeen hab doorasho dadban oo la mid ah doorashada 2016-ka. Heshiiskaas waxaa lagu dhameystiray magaalada Muqdisho 17kii Sebtembar 2020. Heshiiskaas oo loo yaqaan “Heshiiska Muqdisho ee 17 Sebtembar”, wuxuu noqday saldhigga doorashada 2021. Kaasoo lagu ansixiyay fadhi wadajir ah oo baarlamaanka ah 26-kii Sebtembar 2020, waxaana la laalay sharciga doorashada Febraayo 2020 ee OPOV. Golaha Murrashaxiinta Madaxweynaha (CPC) ayaa la dhisay Noofambar 2020 iyagoo koox ka kooban 14 musharrax madaxweyne ka dib markii la laalay hannaankii doorashada OPOV lana qaatay hanaanka doorashada dadban.

Durbadiiba waxaa soo baxay khilaaf ku saabsan sidii loo hirgelin lahaa Hannaanka Doorashada 2021. Puntland, Jubbaland iyo kooxda mucaaradka ayaa diiday dhismaha guddiga doorashada - waxay ku eedeeyeen in xubnaha guddigu ay ka soo jeedaan xafiiska madaxweynaha, hay'adaha amniga iyo dublamaasiyadda. Guddoomiyaha AS, Cabdi Xaashi Cabdillaahi, ayaa diiday guddiga doorashada ee ay DFS u magacawday kuraasta baarlamaanka Somaliland. Maamulka Jubaland ayaa isna ka soo horjeestay sida laga yeelayo 16-ka kursi ee baarlamaanka ee loo qoondeeyay gobolka Gedo.

DFS iyo DG ayaa wadahadal ku saabsan xiisadda doorashada ku yeeshay Dhuusamareeb 3-dii Febraayo, 2021. Laakiin waxay ku guuldareysteen inay tanaasul ka sameeyaan qodobbadii la isku hayay. 6-dii Febraayo 2021, kulan deg deg ah oo ay yeesheen baarlamaanka, Madaxweyne Farmaajo wuxuu ku eedeeyay madaxda dowlad goboleedyada iyo hay’adaha shisheeye inay sabab u yihiin is-mariwaaga. 12-kii Abriil 2021, Golaha Shacabka ayaa ansixiyey muddo kordhin labo sano ah loogu kordhiyay Madaxweynaha. Madaxweynaha ayaa isla markiiba saxiixay qaraarka. 25kii Abriil, ismariwaaga siyaasadeed ayaa sababay dagaal hubaysan oo ka dhacay waddooyinka Muqdisho.

1-dii May ayaa madaxweynuhu ka noqday muddo kordhintii loo sameeyay, golaha wakiiladuna waxay mar kale isugu yimaaddeen oo laalay go’aankoodii hore (muddo kordhinta). Dib uga noqoshada waxaa keenay cadaadiska gudaha iyo dibaddaba uga yimid. Isla maalintaa Madaxweynaha ayaa Ra’iisul Wasaaraha ku wareejiyay doorashada iyo maamulka amniga. 27-kii May, xubnaha Golaha Wadatashiga Qaran (NCC) ayaa heshiis doorasho ku kala saxiixday magaalada Muqdisho.

### Guddiyaasha Maamulka Doorashada

Waxaa la dhistay guddiyo maamula doorashada 2021 ee heer qaran iyo dowlad goboleed kasta, kuwaas oo kala ah.

- Guddiga Federaalka ee Hirgelinta Doorashooyinka (FEIT), oo loo igmaday in ay kormeeraan hannaanka doorashada si loo xaqiijiyo in ay u dhacdo si isku mid ah iyo in la is waafajiyo hannaanka 2016-ka iyo doorashada 2021 iyo inay soo saaraan habraaca doorashada. FEIT waxay ka koobnayd 22 xubnood waxayna xarunteedu tahay Muqdisho.

- Guddiga Dowlad-Goboleed ee Maareynta Doorashada (FMS-EMC). Dowlad Goboleed kastaa waxa ay lahayd Guddi Doorasho (EMC) oo ka kooban 11 xubnood iyagoo hirgalinaya doorashooyinkii DG iyada dusha ka kormeerayso FEIT.

FIET waxay ahayd inay ka koobnaadan farsamo yaqaanno aan xiriir siyaasadeed cidna la lahayn, daacad ah, karti leh, dhexdhexaadna ah. Sumcadda guddiyada doorasha ayaa durbadiiba dood ka dhalatay iyagoo loo arkay inay la safan yihiin dowladda xilka haysa. Mucaaradka ayaa dalbaday in guud ahaan dib u habeyn lagu sameeyo guddiyada doorashada. Waxay ku eedeeyeen in xubnaha FEIT ay ahaayeen kuwo dhinac u janjeera, ama ay saaxiib la yihiin madaxweynaha, ama ay u socdeen inay doorashada boobaan. Dhismaha FIET ayaa markii hore waxaa ka mid ahaa mas'uuliyiin ka tirsan dowladda iyo dad daacad u ah dowladda. Bishii June 2021 waxaa dib u habeyn lagu sameeyay guddiyada doorashada, waxaana la bedelay xubnaha qaar.

### Baarlamaanada Dawlad Goboleedyada

Marka laga reebo Somaliland, baarlamaannada dawlad-goboleedyada ayaa doorta xubnaha AS. Gudoomiyayaasha Baarlamaanka Maamulkaas ayaa maamulayay doorashada Senatarrada AS. Doorashada AS waxay ka dhacday caasimadaha DG; Garoowe, Dhuusomareeb, Jowhar, Baydhabo iyo Kismaayo iyadoo doorashada Somaliland ay ka dhacday Muqdisho. Tirada guud ee xildhibaanada maamul goboleedyada ee soo doortay 54 mudane ayaa ahaa 413 xubnood. Waxaa xusid mudan in tirada guud ee xildhibaanada dowlad goboleedyada ee ka qeyb galay doorashadii 2021 ay ka yaraayeen tii 2016. Yaraantaas waxaa u sabab ahaa tirade xildhibaanada baarlamaanka Koonfur Galbeed hoos loo dhigay (95) si loo waafajiyo dastuurka dowlad goboleedka.

Muhiimada ay xildhibaanada dowlad goboleedyada ku leeyihiin doorashada senatarda AS ayaa ka mid ahayd sababaha ay DFS u farogelisay doorashooyinkii DG si ay u soo saarato xildhibaanno daacad u ah si kor loo qaado rajada madaxweyne Farmaajo ee dib u doorashada. Sidaa darteed, madaxda Koonfur-galbeed, Hirshabeele iyo Galmudug waxay si dhow ula safteen DFS halka Jubaland iyo Puntland ay la safteen kooxaha mucaaradka ah. Qeybaha soo socda waxaan si kooban u eegi doonaa sida gobol kastaa u maareeyay doorashada AQ.

### Habraaca Doorashada

- Doorashooyinka xubnaha AQ waxaa maamulay guddiyo doorasho oo aan rasmi ahayn oo uu dhisay baarlamaanka gobolka kasta ee DG. Marka la soo magacaabo musharaxiinta kursi kasta, golayaasha dowlad goboleedyada waxay si gaar ah ugu codeeyeen kursi kasta.
- Guddiga Doorashada heer Dowlad Goboleed (GDQ) waxa ay codsi qoraal ah u dirayaan Madaxweynayaasha FMS in ay soo gudbiyaan ugu yaraan laba musharax mid kasta oo ka tirsan Aqalka Sare.
- Madaxweynaha DG ayaa u diraya guddiga doorashada liiska musharixiinta u tartameysa dhammaan kuraasta Aqalka Sare ee dowlad goboleedyada.
- Guddigga ayaa xaqiijiyaa matalaadda haweenka ugu yaraan 30%.
- Kharashka diiwaangelinta musharraxiinta ragga ah waxaa loo qoondeeyay $20,000 iyo $10,000 murashaxiinta haweenka ah.
- Guddigga wuxuu daabacaa jadwalka doorashada AS ee kursi kasta.
- Musharax kasta oo hela 50%+1 ayaa ku guuleysanaya doorashada. Haddii mid ka mid ah musharixiinta uu ku guuleysan waayo 50%+1 wareegga koowaad, markaas labada musharrax ee ugu codka badan ayaa u gudbaya wareegga labaad. Wareega labaad waxa ku guulaysan kara musharraxa hela 50%+1 cod.

### Doorashada iyo Ololaha Musharaxiinta

Madaxweynayaasha dowlad goboleedyada ayaa soo magacaabay musharixiinta AS, taasoo si bareer ah u xakameynaysa cidda ku fadhin doonto kursiga. Inkasta oo habraaca doorashada dhigaya in kursi kasta la soo magacaabo ugu yaraan laba musharrax, haddana madaxweynayaasha dawlad-goboleedyada waxay qaateen hab isla mid ah iyaga oo soo magacaabay musharax la door bidayo iyo hal musharax oo magic-u-yaal ah (oo dadku u yaqaanaan malaxiis). Kuraasta AS ayaa intii ay socotay doorashada waxaa ka tanaasulay musharixiintii magic-u-yaalka ahayd, waxaana taasi keentay in hal musharax uu ku guuleysto kursigaas iyadoo cidina la tartamin.

Marka la eego ka qaybgalka siyaasadda, guud ahaan, tirada guud ee musharraxiinta 2021 waxay 6% ka yareyd tii 2016. Hal ilaa todoba musharax ayaa ku tartamay kursi kasta oo AS ah. Kursiga ugu loolanka yaraa ayaa ahaa kursigii gudoomiyihii hore ee AS Senator Cabdi Xaashi. Markii hore waxaa la soo jeediyay in uu kursiga lagu sharfo iyadoo aan cidna la tartamin. Dhanka kale, kursiga ugu loolanka badnaa ayaa ahaa Hirshabeele oo ilaa 7 musharax ay ku tartameen hal kursi oo isna noqday kursigii ugu muranka badnaa.

Musharixiin badan oo xaqa u lahaa oo buuxiyey shuruudihii doorashada, looma ogolaanin inay tartamaan mawqifkooda siyaasadeed awgeed.

| | | Candidates | | Senators elected | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| FMS | No Seats | M | F | M | F | Female (%) |
| Jubaland | 8 | 10 | 6 | 6 | 2 | 25% |
| Southwest | 8 | 12 | 4 | 6 | 2 | 25% |
| Puntland | 11 | 15 | 7 | 8 | 3 | 27% |
| Galmudug | 8 | 12 | 4 | 6 | 2 | 25% |
| Hirshabele | 8 | 27 | 6 | 6 | 2 | 25% |
| Somaliland | 11 | 18 | 7 | 8 | 3 | 27% |
| TOTAL | 54 | 94 | 34 | 40 | 14 | 26% |




# JADWALKA DOORASHADA

Doorashada Senatarrada AS waxay bilaabatay Luulyo 2021, in ka badan hal sano dib u dhac ah, waxayna qaadatay afar bilood in la soo gabagabeeyo. Dib u dhacyo soo noqnoqday ka dib doorashada xubnaha AS ayaa 29-kii Luulyo 2021 ka bilaabatay Kismaayo laguna soo gabagabeeyay 13kii Noofambar 2021 magaalada Dhuusamareeb. Dib u dhaca ayaa waxaa sabab u ahaa qaar ka mid ah madaxda DG oo go'aansaday in la hakiyo kuraasta qaar sababo aan la ogeyn. Puntland iyo Koonfur Galbeed ayaa muddo bil gudaheed ku soo gaba gabeeyeen doorashada halka Jubaland iyo Galmudug ay ku qaadatay muddo afar bilood ah bilowga ilaa dhamaadka doorashada.

| DOWLAD GOBOLEED | START DATE | END DATE |
|---|---|---|
| JUBALAND | 29 JULY 2021 | 21 OCTOBER 2021 |
| SOUTHWEST | 2 AUGUST 2021 | 15 AUGUST 2021 |
| PUNTLAND | 11 AUGUST 2021 | 12 AUGUST 2021 |
| GALMUDUG | 12 AUGUST 2021 | 13 NOVEMBER 2021 |
| HIRSHABELE | 14 SEPTEMBER 2021 | 4 OCTOBER 2021 |
| SOMALILAND | 29 SEPTEMBER 2021 | 30 SEPTEMBER 2021 |

Doorashooyinka AS ayaa lagu qabtay xarumaha baarlamaanka ee dowlad-goboleed kasta. Doorashada Somaliland ayaa lagu qabtay Muqdisho. Guud ahaan 128 musharax ayaa ku tartamay 54 kursi - 27% musharaxiintu waxay ahaayeen haween. Hirshabeele ayaa ugu badnaa musharixiinta (33 musharax 8 kursi) – taasoo ah laba jibaar musharaxiinta sanadkii 2016.

### Jubaland

Maamulka Jubaland ayaa bilaabay doorashada AS kadib muddo dheer oo hubanti la'aan iyo qalalaase siyaasadeed. Madaxweynaha Jubaland Axmed Madoobe ayaa afartii kursi ee hore u fasaxay 9 musharax, dibna u dhigay afarta kursi ee kale. Baarlamaanka Jubbaland ayaa 29-kii bishii July doortay 4 ka mid ah 8-da kursi ee loo qoondeeyay, iyagoo noqday xubnihii ugu horeeyay ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka 11-aad. Cadaadis beesha caalamka ka dib, baarlamaanka Jubaland ayaa soo gabagabeeyey doorashada afarta kursi ee harsanaa 21ka Oktoobar. Labo musharax oo kaliya ayaa dib loo doortay, inta kale waa senatar cusub.

### Puntland

10-kii Ogosto, Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni ayaa soo saaray liiska musharixiinta u tartamaya 11-ka kursi ee Puntland ee AS. Musharixiinta uu soo saaray Madaxweyne Deni ayaa u badnaa kuwa cusub, waxaana ay kamid ahaayeen xubnaha golaha wasiirada Puntland oo uu ku jiro guddoomiye gobol. Labo Senatar hore ayaa lagu daray liiska musharixiinta halka siyaasiyiin kale sida ra'iisul wasaare hore Cumar C/rashiid liiska laga saaray.

Baarlamaanka maamul goboleedka Puntland ayaa labo maalmood oo xiriir ah (11-12 Ogosto) ku doortay 11 senator oo noqonaya maamulkii ugu horreeyay ee soo dhameystira doorashada aqalka sare. Sagaal ka mid ah musharixiinta ayaa lagu doortay tartan la'aan kadib markii musharixiintii la tartameyey tanaasuleen. Labo musharax oo kaliya ayaa loo codeeyey oo midkiiba helay ku dhawaad 80%.

### Koonfur Galbeed

Maamulka Koonfur Galbeed ayaa doortay 5 ka mid ah 8-dii kursi ee loo qoondeeyay 2-dii bishan Ogosto, 3-da kursi ee soo hartay waxaa la doortay 15kii Ogosto Koonfur Galbeed oo noqonaya maamulkii 2-aad ee soo dhameystira doorashada Aqalka Sare. Doorashada AS ee Koonfur Galbeed waxaa hareeyay eedeymo la xiriira nin jecleysi iyo eex. Madaxweyne Laftagareen ayaa lagu eedeeyay in xubnaha ehelkiisa iyo xubnaha ay isku dhow yihiin u magacaabay kuraasta AS.

### Hirshabele

Inkastoo Baarlamaanka Hirshabele iyo Madaxweynaha ay DFS soo xushatay dabayaaqadii 2020-ka, Madaxweynaha Hirshabeele Cali Guudlaawe ayaa doorashada ka dhigay mid furan oo u ogolaaneysa dhammaan musharaxiinta. September 8, 2021 Madaxweyne Cali Guudlaawe ayaa soo saaray liiska musharixiinta 8-da kursi ee AS ee ka imaanaya Hirshabeele. In ka badan 30 musharax ayaa ku tartamay 8 kursi ee Hirshabeele. Sababta ugu weyn ee doorashada Hirshabelle uga duwan tahay maamulada kale ayaa ah in magaalada Jowhar ay ku sugan yihiin ciidamo badan oo ka soo horjeeday muddo kororsiga madaxweyne Farmaajo, waxaana ay ku hanjabeen inay tallaabo qaadi doonaan haddii doorashada lagu shubto. Taas waxaa u dheeraa in Madaxweyne Guudlaawe uu wajahayo reer Beledweyne oo mucaarad ku ah dowladdiisa, sidaasi darteedna uu ku qasbanaaday in doorashada ay noqoto mid u furan dhammaan musharaxiinta.

3-dii kursi ee ugu horreysay waxaa la doortay 14-kii Sebtembar, 2021, waxaana lagu doortay magaalada Jowhar. Gacan ka hadal ayaa dhex martay xildhibaanada baarlamaanka Hirshabeele, waxaana la damiyay nalalka xarunta doorashada xili ay socotay tirinta codadka mid ka mid ah kuraasta AS. Dhexdhexaadin ka dib, doorashada kursigaas waxaa la doortay 4-tii Oktoobar.

### Galmudug

Ogosto 12, 2021, baarlamaanka dowlad goboleedka Galmudug ayaa cod gacan taag ah ku doortay lix mudane. Cadaadis badan oo gudaha iyo dibadda ah ka dib, Galmudug ayaa ugu dambeyntii soo gabagabeysay doorashadii AS 13-kii Nofembar – oo noqotay Dowlad-goboleedkii ugu dambeeyay ee soo dhameystira senetarada AS. Looma tartamin dhammaan 8-dii kursi ee AS ee Galmudug – dhammaan musharrixiinta 'malxiis' ayaa ka tanaasulay musharraxnimadooda. Ilaa 50% mudanayaasha aqalka sare ayaa ahaa mudanayaal hadda xilka haya oo dib loo doortay, waxaana dad badan ay ku tilmaameen in madaxweyne Qorqor uu u abaal-guday saaxiibadiisa siyaasadeed.

**Somaliland**

Doorashada senatarada Somaliland waxay noqotay caqab ugu weyn doorashada qaranka. Guddoomiyihii hore ee AS, Cabdi Xaashi iyo Ra'iisul Wasaare ku xigeen Mahdi Guuleed oo saaxiib dhow la ah Madaxweyne Farmaajo, ayaa in muddo ah waxaa ka dhex taagnaa muran ku saabsan qaabka loo maareynayo doorashada Somaliland iyo magacaabista guddiga doorashada Somaliland.

Bishii Nofeembar 2020, Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu magacaabay guddiga doorashada oo ka kooban 11 xubnood, si ay u soo xulaan xubnaha Somaliland u matalaya labada aqal ee baarlamaanka. Waxaa xigay khilaaf ka taagnaa guddoonka guddiga – xubnaha ay soo kala magacaabeen Guddoomiyihii hore Cabdi Xaashi iyo Ra'iisul Wasaare ku xigeenka Mahdi Guuleed ayaa ku kala qeybsamay, iyadoo mid walba uu doortay guddoomiye u gaar ah. September 5, 2021, labaduba waxay heshiis ka gaareen khilaafkii doorashada waxayna go'aansadeen in la mideeyo guddiga doorashada waxayna 19kii Sebtembar soo saareen Hannaanka Doorashada. Waxayna isku raaceen in ergo ka kooban 46 xubnood - 23 xubnood oo ay soo magacaabeen odayaasha dhaqanka iyo 23 xubnood oo ay soo xuleen saxiixayaasha.

21kii Sebtembar, Senator Cabdi Xaashi iyo Ra'iisal Wasaare ku xigeenka Mahdi waxay liiska musharixiinta 11-ka kursi ee Somaliland ee UH u gudbiyeen Ra'iisal Wasaare Maxamed Rooble. 29kii iyo 30kii Sebtembar, waxaa Muqdisho lagu doortay dhammaan kuraasta AS Somaliland.

## Qoondada Haweenka

Juun 2020 ayaa baarlamaanka Soomaaliya ansixiyay sharci ogolaanaya in 30% kuraasta baarlamaanka loo qoondeeyo haweenka. Madaxweyne Farmaajo iyo madaxda DG ayaa saxiixay bishii Sebtembar heshiis doorasho oo ay ku jiraan qoondada haweenka 30% ah. Ugu yaraan 17 kursi ka mid ah kuraasta Aqalka Sare ayaa loo baahan yahay si loo gaaro qoondada haweenka ee 30%. Ma jirin hannaan cad oo lagu gaari karo yoolkaas. Bishii Luulyo, Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu magacaabay guddi ka kooban 13 xubnood si ay wacygeliyaan una kormeeraan qoondada haweenka ee 30%.

Musharixiinta dumarku ee AS ayaa korortay 2% waxayna gaareen 27%. Kororka ayaa sabab u ahaa hoos u dhaca tirada musharraxiinta ragga ah. Sidoo kale matalaadda haweenka ee AS ayaa 2% kordhay. Haweenka hadda waxey AS ku leeyihiin 26%. Tani waxaa sabab u ah hal kursi oo dheeri ah oo ka yimid Jubaland. Jubaland ayaa markii hore 1 kursi oo dumar ah oo kaliya ku lahyd Aqalki Sare .

## Xallinta Khilaafaadka

Guddiga xalinta khilaafaadka doorashada (EDRC) ayaa loo igmaday inay wax ka qabtaan dhammaan khilaafaadka/cabashada doorashada. EDRC waxay ka kooban tahay kow iyo labaatan (21) xubnood, 9 ka mid ah waxaa soo magacaabaya DFS, halka 12ka xubnood ee kale ay soo kala magacaabeen DG iyo Somaliland, min laba xubnood. Qofka codsigiisa musharraxnimadiisa la diiday ama aan la aqbalin wuxuu gudbin karaa cabasho iyadoo la raacayo nidaamka EDRC. Inkastoo ay jireen cabashooyin aan rasmi ahayn oo qaarkood ay cabashadooda ku baahiyeen warbaahinta, haddana ma jiraan cabashooyin rasmi ah oo ka diiwaangashan EDRC.

## Amniga

Guud ahaan doorashada AS waxay ku dhacday si nabad ah. Ma jirin dhacdooyin amni daro ah intii lagu jiray xilligii doorashada AS. Hase ahaatee, Hirshabeele ayaa rabshado iyo qalalaase ka dhacay hoolka doorashada iyadoo xubno careysan kasoo horjeesteen natiijadii ka soo baxday wareegii koowaad ee mid kamid ah kuraasta AS. Intii ay socotay tirinta codadka ayaa waxaa la damiyay korontadii iyo makarafoonada goobta ay ka dhaceysay doorashada, waxaana la joojiyay doorashada kursiga. Taasoo markii dambe la xaliyay.

## Kormeerayaal

Senatarrada waxaa inta badan doortay baarlamaanada dowlad-goboleedyada iyadoo ay ilaalinayaan guddiga doorashada heer dowlad-gobol oo ay weheliyaan guddiga doorashada federaalka. Isbahaysi todobo ururo bulshada rayidka ah ka kooban ayaa u kuurgalay doorashada AS iyaga oo ah goob-joogayaal gudaha ah. Kormeerayaasha waxay ku tilmaameen in doorashada AS mid aan loollan lahayn hareereeyey dib u dhac ballaaran. Kormeerayaasha dibeddu waxay door aasaasi ah ka ciyaaraan horumarinta hufnaanta iyo isla xisaabtanka geeddi-socodka doorashada, iyo sidoo kale kalsoonida shacabka Soomaaliya. Ha ahaatee, doorashada Somaliland ee AS ayaa waxaa goob joog ka ahaa Ra'iisul Wasaare Rooble iyo Ergayga gaarka ah ee Qaramada Midoobay James Swan. Beesha Caalamka oo ka walaacsan dib u dhaca doorashada ayaa soo dhoweeyay gabagabada doorashada AS, mana jirto wax walaac ah oo si cad uga soo baxay musuqmaasuqa hareeyay doorashada. Beesha Caalamka dhamaystirka doorashada Soomaaliya ayaa uga muhiimsanayd doorashada inay noqoto mid hufan.

## NIN JECLAYSI IYO MUSUQMAASUQ

Doorashada AS ayaa ku bilaabatay qaab musuq-maasuq ah, iyadoo inta badan musharixiinta ay si gaar ah u soo xusheen madaxweynayaasha dowlad goboleedyada. Hogaamiyayaasha FMS waxay ansixiyaan kaliya musharaxiinta loo arko inay isku siyaasad yihiin.

Musharaxii madaxweyne ee hayste tiro senataro ah waxay u tahay fursad wanaagsan. Sidaa darteed shanta madaxweyne Dowlad Goboleed waxay magacaabeen oo keliya senataarada hadhow codkooda lagu xisaabtami karo. Nin jecleysi ayaa hareysay doorashada Aqalka Sare ee Soomaaliya, iyadoo la xusul duubay tiro badan oo rabtay inay Aqalka Sare u tartamaan.

Soomaaliya ayaa ka mid ah dalalka ugu saboolsan adduunka iyadoo heerka faqriga uu yahay 71%. Kharashka faraha badan ee isdiiwaan gelinta oo dhan 20,000 oo dollar oo ragga musharaxiinta ah iyo $10,000 oo ah musharaxiinta dumarka ah ayaa loo arkay inay caqabad weyn ku ahayd ka qaybgalka siyaasadda. Lacagta xad-dhaafka waxay ka dhigtay kuraasta Aqalka Sare kuwo gaar ah dabaqada hodanka ah iyo kuwa dibedda laga soo maalgeliyo logu talogalay. Musharixiinta u taagan xilka madaxweynaha ayaa dhaqaalaha ololaha doorashada ku maalgeliya. Lacagta diiwaangelinta la qabtay waxay kor u dhaaftay $2m. Hirshabeele ayaa uruurisay lacagtii ugu badnayd ($600,000) maadaama ay u ogolaatay musharaxiin badan. Ma jirin habraac maaliyeed oo hufan ku aadan sida loo maamulo dakhliga doorashada.

**Candidate Fees**

| State | Candidates | | |
|---|---|---|---|
| | M | F | Total |
| Jubaland | 200,000 | 60,000 | 260,000 |
| Southwest | 240,000 | 40,000 | 280,000 |
| Puntland | 300,000 | 70,000 | 370,000 |
| Galmudug | 240,000 | 40,000 | 280,000 |
| Hirshabele | 540,000 | 60,000 | 600,000 |
| Somaliland | 360,000 | 70,000 | 430,000 |
| TOTAL | | | 2,220,000 |

Dhammaan maamullada DG waxay si bareer ah uga qaybqaataan iibsashada codadka xildhibaannada.

- Sida ay sheegayaan ilo-wareedyo ku sugan xarunta doorashada Somaliland, dhammaan musharraxiinta ayaa lacag kala duwan siiyey 46-ta ergo iyo madax dhaqameedyada. Saddex ka mid ah lixda kursi ee ugu horreeyey ayaa la rumeysan yahay in si weyn loogu loolamayey.

- Goobjooge ku sugan xarunta odayaasha ayaa xaqiijiyay in musharaxiinta qaar ay bixiyeen lacag dhan $2,000 ilaa 4,000 oo dollar halkii ergo. Warar lagu kalsoon yahay ayaa sheegaya in maamulka Jubaland uu bixiyay lacag dhan $20,000, xildhibaan walba iyadoo labo jeer la kala siiyay lacagtaas. Musharrixiinta ayaa si gooni gooni ah u bixiyay lacag dhan 500 ilaa 1500 xildhibaan kasta. Maamulka Puntland wuxu guud ahaan xildhibaanada maamulkaasi siiyay in ka badan 2 milyan oo dollar, si ay u doortaan musharaxiinta maamulka watay. Xildhibaanada Koonfur Galbeed ayaa la siiyay lacagta ugu yar (min 3,000 oo Dollar). Sidoo kale Xildhibaanada Galmudug ayaa la siiyay lacag aan la shaacin.

- Hirshabeele xaalku wuu ka duwanaa. Maamulka Hirshabelle ayaa ka fogaaday ololaha musharaxiinta. Musharixiinta ayaa si toos ah ugu tartamayey codadka xildhibaanada baarlamaanka. Sida laga soo xigtay dhowr qof oo aan wareysanay musharrixiinta waxay bixiyeenn lacag u dhexeysa $1000 ilaa $4000 xildhibaan kasta. Ilo kale ayaa Xarunta Aaran u xaqiijiyay celcelis ahaan Xildhibaanada dowlad goboleedka Hirshabelle in laga yaabo in ay heleen lacag dhan $40,000 midkiiba intii ay socotay doorashada AS.

Madax-bannaanida baarlamaannada dawlad-goboleedyada ayaa si weyn loo wiiqay. Iibsashada cod bixinta waxay abuurtaa ku tiirsanaanta codbixiyayaasha dakhliga ay ka helayaan codkooda. Dhinaca kale, siyaasiyiinta ugu musuq-maasuqa badan ee ku hawlan iibsashada codadka, ayaa weli ah kuwa laga sugayo inay wadanka samata bixiyaan.

# QEYBTA 4AAD: GUNAANAD

Mid ka mid ah shaqada ugu muhiimsan ee AQ waa in ay matalaan dowlad goboleedyada. Laakiinse, qaar ka mid ah DG-yada ayaan si sax ah oo dastuurka waafaqsan loo dhisin. Saami qaybsiga kuraasta golaha AS ma ahan mid cadaalad iyo sharci ku dhisan. AS waxa uu ku guuldareystay inuu xaliyo khilaafkii DFS iyo DG sidoo kale wuxuu awoodi waayey in DG ka ilaaliyo faragelinta DFS ay ku haysay doorashada maamul goboleedyada. AS sida hadda u dhisan yahay, ma laha awood mug leh si uu si macno leh u matalo gobollada iyo shacabkooda.

Dhanka kale, xiriirka labada aqal ayaa waxaa hareeyay is qab qabsi joogto ah iyo khilaaf aan dhamaad laheyn, kaasoo sababay in Aqalka sare uu gabi ahaanba hakiyo shaqadiisa. Waxa jiray xeerar dhawr ah la hirgeliyey iyo guddiyo qaran oo la magacaabay iyadoo aanay AS lagala tashan.

Doorashada 2021 AS wey ka dartay tii 2016. Madaxda DG waxay heleen awood aan hore loo arag, waxay nashqadeeyeen qaabka doorashada iyo habraaceeda, waxay magacaabeen guddiyada doorashada, waxay xusheen musharaxiinta ay doonayaan, sidoo kale waxay maalgaliyeen ololaha musharaxiinta. Doorashada aqalka sare ee been abuurka ah eek u saleysan nin jeclaysi, musuq iyo eex ayaa waxay hor-dhac xun u tahay doorashooyinka golaha shacabka iyo kuwa mustaqbalka soo socdo. Dadka qaar ayaa ku dooda in doorasho boob ah la qabto ay ka fiican tahay inaan doorasho dhicin. Haddii ay sidan ku sii socoto doorashada, waxaan marqaati ka noqon doonnaa dib u dhac weyn oo Soomaaliya ku imaanaya si ay u gaarto dimuqraadiyad, horumar dhaqaale iyo xasillooni siyaasadeed.

Dhanka kale, dad badan ayaa is weydiinaya baahida loo qabo in Soomaaliya lahaato labo aqal. Aqalka Sare ayaa loo arkaa inuu yahay mid aan ilko siyaasadeed lahayn.

# TALO JEEDIN

1.Xukuumadda imanaysa inay wax ka beddesho qodobka 72 ee dastuurka si loo xaqiijiyo in dhammaan dawlad goboleedyada iyo beeluhu ay helaan matalaad siman.

2. In maqaamka iyo matalaadda Gobolka Banaadir wax laga qabto sanadka ugu horreeya ee dowladda cusub.

3.Sharci ahaanshaha Dowlad-Goboleedya waa in saxaa;

- Sharciga qeexaya tirada iyo xuduudaha DG waa inuu meelmariyaa Golaha Shacabka.
- Sharciga qeexaya tirada iyo xudduudaha degmooyinka dowlad-goboleedka waa in baarlamaanka meelmariyaa.

4.In la sameeyo doorasho muddaysan, la horumariyo xisbiyada mucaaradka ah iyo awood la siiyo shacabka ayaa muhiim u ah inay Soomaaliya hesho siyaasad degan kana rabshado iyo qalalaase.

5.Guddiga doorashooyinka qaranku waa in loo madaxbaneeyaa lana siiyaa awood si fiican iyo qalabeeyn si ay hawsha doorashada u gutaan. Xubnahan Guddiga waa in dib u eegis lagu sameeyaa si loo hubiyo inay ka kooban yihiin farsamoyaqaanno, kuwo aan xisbina ka tirsanayn oo lagu kalsoonaan karo oo dhexdhexaad ah iyo kuna sifoobay daacadnimo.

6.Waa in aan la xadidin tirada musharixiinta haddii ay buuxinayaan shuruudaha musharraxnimada.



HornAfric Suite, National Theatre Rd,
Mogadishu, Somalia
Tel: +252 613 777 708
P.O Box 52743 Valley Arcade, Nairobi, Kenya
Tel: +254 723 022 444
Email: info@aarancenter.org
Website: www.aarancenter.org

AARAN CENTER
For Social and Economic Development